
AXBARASHADA DADWEYNAHA EE
UGSIYADA H/DHEXE SOOMALIYEED



# Sheekadi Cali



SAFKA SHANAAD 5

# MOOJUULKA SHANAAD

# 1

*(Sheekada Cali)*

Waa urur cashar-diyaarinno ah, looguna tala galay in lagu kaalmeeyo barayaasha wax ka dhiga safka shanaad ee dugsiyada asaasiga ah.

Cashar-diyaarinnadani waxay ku salaysan yihiin mawduucyo hore ugu jirey manhajka sayniska safka shanaad ee cilmiga bulshada iyo daryeelka guud ee caafimaadka.

Safka Shanaad Cilmiga Beesha ... Dadka dunida raadka uu ku leeyahay guur-guurku baaxadda dadweynaha.

Safka Shanaad Sayniska ... Taranka aadamiga iyo xannaanaynta carruurta.

Safka Shanaad Daryeelka Guud ee Caafimaadka ... Caafimaadka bulshada iyo fayadhawrkeeda.

Moojuulkan waxa uu ka kooban yahay lix cashar-diyaarinnood oo u habaysan siday isugu xigtay noloshii carruurnimo ee wiil loola baxay Cali. Waxa la filayaa inay kor u qaaddo xiisaha iyo nuxurka manhajka aannu kor ku soo sheegnay. Cashar-diyaarinnadu waa sida tan:-

| | |
|---|---|
| Casharka Koowaad ................ | Cali waa isdareensiiyey. |
| Casharka Labaad .................. | Cali oo ku soo biiray Adduunka. |
| Casharka Saddexaad ............... | Gabankii Cali ahaa aad buu u bukaa. |
| Casharka Afaraad .................. | Cali Walaalihiis. |
| Casharka Shanaad ................. | Cali Dugsi buu galay. |

**Ujeeddooyinka Waxbarasho:**

1. In lagu kaalmeeyo carruurta aaraada asaasiga ah ee la xidhiidha koritaanka iyo qaangaadhnimada. Si ay si wanaagsan wax uga bartaan koritaankooda iyo horumarkooda.
2. In laga kaalmeeyo carruurta inay gartaan inay ku tiirsan yihiin dadka waaweyn inta ay yar-yar yihiin, waxayna taageero gaar ah uga baahan yihiin bulshada kale.
3. In laga caawiyo ilmaha horumarinta war-ururinta, xulashada iyo tarjumidda.

**Fikradaha asaasiga ah ee dadweynaha la xidhiidha.**

1. In ay wax ka fahmaan taranta aadamiga (Labka iyo Dheddiga).
2. Fikrad ahaan aadamiga sida sinjiyada shimbiraha iyo ugaadhaba waxay qorshaystaan ama u diyaargaroobaan dhalmada iyo korinta ubadka.
3. Ubadka yar-yari waxay leeyihiin baahi gaar ahaaneed, taasoo qoyska ku soo kordhinaysa baahi cusub.
4. Waxa ugu badan ee abaydinka (dhab-ku-jirka ah) xanuunka iyo dhimashadaba u keena waxay la xidhiidhaan nafaqo-darrida, gaar ahaan ku duwid-la'aanta naaska hooyada.
5. Xidhiidh weyn ayaa ka dhaxeeya kala-fogeynta dhalmada qoyska iyo caafimaadka hooyada iyo carruurta.
6. Xidhiidh qoto dheer ayaa ka dhexeeya baaxadda qoyska iyo daryeelkooda.

Casharradan oo dhami waxay ka bilaabmaan "Fal bilow", waxaana ku xiga "Fal barasho", "Fidin iyo naqtiin taxane ah".

**Waxa jira falal badan oo la soo jeediyey oo ka badan inta aad isticmaali kartid.**

Ujeeddada laga leeyahay qorshayaashan waxay tahay in barayaasha la siiyo afkaar iyo dariiqooyin kala duwan oo ah kuwa ugu habboon ee ay adeegsan karaan, ilaa heer. Guud ahaan xoogga waxa la saaray (mudnaanta la siiyey) fasalka (waxyaalaha laga hadli karo), gaar ahaan carruurta waxbaranaysa. Waxaannu isku daynay in aannu dhiirrigelinno carruurta, iyagoo barahooda la kaashanaya in ay fikiraan, kana hadlaan arrimaha yar-yar ee la soo kulma. Waxaanuna aaminsan nahay inay arrintani xiiso weyn ku abuuri karto, kuna dhawaado ardaygu inuu dareemo waxbarasho dhab ah. Dariiqadan carruurta ayaa doorweyn ka ciyaaraysa. Sidaas ayey ku noqoneysaa waxbarashadu mid midho dhalisa.

*Cabdi Ibraahim Cawaale*
*Maxamed Maxamuud Xaddi*
*Shamis Maxamed Nuur*
*Tony Johnston*
*Mashruuca Waxbarashada Dadweynaha.*
*Wasaaradda Waxbarashada & Barbaarinta.*

*Muqdisho, Ma.. 1983*


## CASHARKA KOOWAAD

*"Cali waa uu isdareensiiyey"*



Ku Bilow Sheekadani.

Ibraahim iyo safiyo waxay imminka isqabeen muddo sannad ah, nasiib wanaag, Safiyo waxay heshay uurkii ugu horreeyey, taasoo farxad gelisay qof kasta oo qoyska ka mid ah. Ibraahim Awoowgiis-aabbe oo haatan nin da' ahi wuxuu filayaa (jecel yahay) in ilmaha safiyo uurka ku sidaa noqdo wiil si uu u dhaxlo beerta qoysku leeyahay. Safiyo hooyadeedna waxay rajeyneysaa in ilmaha uurka ku jiraa noqdo gabadh, taas oo markey weynaato xannaaneyn doonta carruurteeda yar-yar ee dhalan doonta. Ibraahim baa labadoodiiba ku yiri "wiilka iyo gabadhu waa isku mid haddii Ilaahay caafimaad siiyo". Safiyo oo ah hooyo garaad fiican ayaa waxa ay aaminsan tahay in hooyada caafimaadka qabtaa dhali karto ilmo caafimaad qaba. Sidaa darteed, ayey Safiyo duhur kasta u nasataa, maalin walbana iskugu daydaa inay quudato cuntooyinka nafaqada leh ee caawin kara koritaanka ilmaha uurka ku jira. Safiyo waxay maalin walba laba jeer booqataa xarumaha lagu daryeelo hooyooyinka iyo carruurtooda iyo takhtarka u gaarka ah. Halkaas oo lagu eego caafimaadkeeda iyo ka ilmahaba. Gabdhaha kalkaaliyaasha ee ka shaqeeya xarumaha daryeelka caafimaadka hooyooyinka iyo takhtarkuba, waxay Safiyo ku caawiyeen inay si fudud u dhasho. Safiyo hooyadeedna waxay ka kaalmeeysay xagga nadaafadda guriga, cunto karinta iyo diyaarinta dharka canugga cusub (la filayo). Ibraahim oo ah ninkii Safiyana, dadaal kuma yara. Ibraahim waxa uu qabtaa shaqo dheeraad ah, oo hawl maalmeedkiisa ka baxsan si uu u helo lacag badan. Ibraahim wuxuu sameeyey sariir qori ah iyo armaajo cusub oo lagu rido (xafido) dharka ilmaha la filayo. Safiyo way dareensan tahay inay dhawaan umuleyso. Waayo caloosheedii wayweynaatay, waxayna dareentay dhaqdhaqaaqa ilmuhu sameynaayo. 'Aah" bay tidhi Safiyo "kaasi waa Cali oo doonaya in la dareemo".



**Doodda Fasalka.**



Maxay Safiyo ugu tagtay Takhtarkeedii?
Muxuu Takhtarku Safiyo ku yidhi?
Maxay Safiyo u aadaa xarumaha lagu xannaaneeyo carruurta?
Maxay xaruuftani X.L.X.DH.H. ka taagan tahay?
Waa maxay si-yaabaha ay u caawini karaan Safiyo Kalkaaliyayyaasha joogtada ku ah xarumaha xannaanada carruurta?
Safiyo uur bey leedahay. Waa maxay micnaha eraygu?
Maxay Safiyo isugu daydaa inay nasato maalin kasta?

**Fiiro Gaar ah.**

Waa lagama maarmaan in laga doodo, xooggana la saaro faa'iidooyinka ku jira cuntada nafaqada leh ee hooyada uurka lihi u baahan tahay. Maalin walba hooyada filaneysa inay dhasho ilmo caafimaad qaba waa in ay isku daydaa in ay qaadato cuntoyinkan hoos ku qoran:

B. Hilib, Kalluun, Ukun, Digaag, CaT. Basal, Salad ama (Ansalaato), Bagal, Raansow.
J. Dabocase, Yaanyo, Bocor.
X. Bambeelmo, Babaay, Cambe, Canab.
KH. Moos, Rooti, Bariis, Baasto, Baradho.

Fal Barasho.

1. Ku kaalmee carruurta inay ku sameeyaan sabuuradda liis ah xoolo ay carruurtu garan karaan, marka loo eego dhinaca dirkooda. Tusaale.

| | |
|---|---|
| Dibi | Sac. |
| Diiq | Digaag. |
| Orgi | I.W.M. |

Ku dhiirrigeli carruurta inay ka hadlaan faraqa u dhexeeya xoolahaas.

2. Weydii carruurta inay fasalka gudihiisa ku sameeyaan sawirro dad ah. U qeybi sawirradaasi labo qaybood ... kuwa wiilasha iyo kuwa gabdhaha ah.
Ku dhiirigeli carruurta inay ka hadlaan faraqa u dhexeeya ...... Tusaale.

Timaha.
Dharka.
Ciyaaraha ay ciyaaraan.
Qaabka jirkooda (dhismaha jirkooda) iwm.



3. U soo jeedi carruurta inay abaabulaan (sameeyaan) hal-xiraale fasalka gudihiisa, taasi oo kooxi ku qoreyso sabuuradda magacyada xoolaha, ta kalana ay ku qorto magacyada xayawaankaasi marka uu yar yahay ...... Tusaale:-

| | |
|---|---|
| Digaagga (dooro) .............. | Boojaal, Dicin. |
| Sac .......................... | Weyl. |
| Ey ............................ | Ey-yar. |

U daa koox walba waqtigooda ha qaataane. Kooxda ku guuleysata waa kuwa hela jawaabta ugu badan ee saxa ah.

4. Falalkan kor ku xusan waa la sii wadi karaa iyadoo carruurta la weydiinayo inay ka hadlaan magacyadooda.


U ogolow carruurta inay helaan magacyada wiilashu u badan yihiin iyo kuwa gabdhuhu u badan yihiin. Waa maxay magacyada loogu jecel yahay in loo la baxo wiilasha iyo gabdhahaba. Waa maxay macnaha magacyadoodu leeyihiin?

5. U ogolow carruurta inay ka hadlaan ama wax ka sheegaan shimbiraha caanka ku ah deegaanka ay carruurtu ku nool yihiin ...... Tusaale:-

Yay-yar ama Xamaraha.
Ciyow.
Xuunsho.
Tuke.
Goroyo.

Marka ay shimbiraha waaweyni isu diyaariyaan inay dhalaan ugxan (ka hor inta dheddiga dhalin ama dhigin ukuntooda) waa maxay waxa ay qabtaan shimbiraha intooda badani? Sidee bay shimbiruhu isugu diyaariyaan carrurtooda yar-yar ka hor inta ayan dhalin?

Sidee baa hooyooyinka iyo Aabayaasha isugu diyaariyaan? Maxay qabtaan shimbiruhu ka hor inta aanay waxba u dhalan? Maxay muhiim u tahay inaad ka hor qorsheysatid?





Fiiro Gaar ah. Safka shanaad manhajka Sayniska iyo barashada caafimaadka waxa ku jira mawduucan ... "Taranta Aadamiga, xannaaneynta carruurta inta ayan dhalan ka hor iyo ka dib". Mawduucan dhigistiisu aad bay u adag tahay gaar ahaan marka heerkan la joogo, gabdhaha ku jira fasalka shanaad way qaan gaadhaan, sidaa darteed way fahmi karaan dhalmada. Haddaba markii aanu gees walba ka eegnay waxaannu isla garanay inay heerkan ku filan tahay in loogu sharaxo "Taranta aadamiga" sidan hoos ku qoran.

B. Ku dhiirigeli carruurta in ay ku caawiyaan baraha sidii uu ugu sameeyn lahaa sabuuradda liis ah xayawaannada dhala ukunta (ugxanta).

Tusaale:-

Diin badeedka.
Raha.
Digaagga.
Goroyada.





U oggolow carruurta inay ka hadlaan halka ay ugxanta (ukunta) dhigaan ... midabka ukunta ... iyo intee bay ku qaadataa dilaacintoodu.

T. Waa lagama maarmaan in la baro nuxurkan soo socda ......

1. Sida xayawaanka ayey haweenku (gabdhaha iyo dumarka w/weyn) soo saaraan ugxan ama ukun. Ugxantani way kortaa, waxayna ku keydsan tahay labo kiish oo yar-yar loona yaqaan minka.

2. Marka gabadhu gaadho da'da 12 ama 13 sano (mar-mar ka yar ama ka sii weyn) ayaa minkeedu bilaabaa shaqadiisa waqtiga ugu horreeya. Ka dib bishiiba hal mar ayuu hal ugxan ah sameeyaa, waxa jiri kara bilo aan minku soo saarayn ukunta.

3. Ukunta haweenka waaweyn iyo gabdhaha si fudud looma arki karo, sida loo arko kuwa xayawaanka oo kale.
4. Marka ukuntu ay ka soo baxdo minka, waxay raacdaa dhuun dhuuban. Haddii ay ukuntu ku bislaan weydo dhuuntan gudaheeda, waxay isla markaas u soo dhaaftaa jirka dibaddiisa, iyadoo noqota dhiig muddo gaaban socda.
5. Dhiigga ay dumarku helaan bil walba waxaa loo yaqaan "Caado". Caadadu waa calaamad aad faa'iido u leh. Dhiiggu wuxuu sheegayaa inay gabadhu caafimaad qabto, in jirkeedu si caadi ah u shaqeynayo iyo in ay soo saarto ukun, taasoo ina tusaysa in ay tahay mid dhali karta, iyo ukuntani haddii ayan bislaanin oo macnaheedu yahay in ayan gabadhu uur lahayn.
6. Ragga iyo wiilashu ma laha ukun. Waxay soo saaraan Xawo (Shahwo) oo ku jirta laba (kiish). Labada kiishna waa ay ka baxsan yihiin jirka, waxaana loo yaqaan Xiniinyo.
7. Markay wiilashu koraan oo ay gaaraan da'da 15 ilaa 16 jir, ayey soo saaraan shahwo, taasoo la kulanta ukunta dheddigga.
8. Sidaa awgeed, marka labo ruux isu galmoodaan waxaa ka soo dhex baxa ama sameysma ilmo (canug). Dheddiggu waa ka soo saara ukunta, labkuna wuxuu sameeyaa shahwada.
9. Carruurtu waxay u baahan yihiin jacayl iyo daryeel (xannaano) ay ka helaan labada waalid, oo ay ka mas'uul yihiin quudintooda, dharkooda, gurigooda iyo waxbarashadooda. . . Dadka Soomaaliyeed, waxa ay leeyihiin caadooyin guur oo wanaagsan oo ay ku dhaqmaan. Taasi oo dhalisay in hooyooyin wanaagsan oo badani ay jiraan. Aabbayaal maskax fiican leh oo koritaankooda xil iska sarayna way jiraan. Soomaaliya marka labada ruux is-guursadaan waxay diyaarsadaan wixii daruuri ah, waxay kaloo qorsheystaan, isuna diyaariyaan ilmahooda dhalan doona. Nuxurkani waxa si wanaagsan loogu fidin kara falal ahaan taaso lagu dhiirrigelinayo carruurta inay ka hadlaan caadooyinka iyo xafladaha loo sameeyo guurka, iyo waliba inay ka hadlaan waxyaabaha loo qorsheeyo intaan ilmaha hore dhalan.



**"Goorma ayaa walaasheydii weyneyd la guursaday. . . . . . ."**
**"Dhaqso ayaa ina-adeertay loo guursan doonaa. Mar hore". . . . . . .**

## CASHARKA LABAAD

*Çali oo ku soo Biiray Adduunka*

**Bilowga Sheekada:**

Safiya waxa u dhammaatay sagaalkii bilood ee sidka haweenka. Aroor hore, ayey la soo toostay xanuunkii foosha. Isbitaalka dumarka ayaa deg-deg loogu qaaday, halkaas oo ay ummushay wiil caafimaad qaba miisaankiisuna dhan yahay saddex kiilo iyo badh. Afar berri ayaa iyada iyo cunuggeeduba lagu xannaaneeyey isbitaalka dumarka ka dibna gurigeedii ayey caafimaad qab loogu soo ceshay. Safiya waxa ay u bixisay wiilkeedii Cali ayada oo ugu magac dartay Awoowgii Aabbe, qoyska oo dhami aad ayey ugu farxeen dhalashada iyo magaca loo bixiyeyba. Sidaasna waxa looga sameeyay xaflad wanqal ah. Xafladdaa waxa ka soo qayb galay saaxiibbadooda iyo jiiraankooda oo dhan, hore umay arag xaflad heerkaasi ah, nooc cunto ah oon halkaa la keenin ma jiraan, macaan, dhanaan, qabow, kuleyl iyo maamuus waa loo dhammeeyay. Iidaanka iyo geedahaba si miisaaman ayaa loogu daray.

Waxa iyana goob joog ahaa koox ka tirsan hiddaha iyo dhaqanka oo wacdaro ka muujiyey fagaaraha. Gabayada, geeraarada, buraanburka, halaanhalka iyo heesaha mid walba midka kale waa ka darnaa. Duco ballaaran ayaa halkaa ka dhacday, Cali waxa loo rajeeyay in uu noqdo kii dalkiisa iyo diintaba anfaca.

Safiya waxa ayey dareesan tahay in xilkeedii ballaadhay, waayo, waxa isna xanaano dheeraad ah u baahan Cali oo maalintii shan jeer loo qubeeyo la maaweeliyo lana xambaaro. Ibraahim iyo afadiisuba waxa ay rumeysan yihiin in ay xilka qoyska ku gudan karaan xilqaad dheeraad ah iyo iskaashi.



**Doodda Fasalka:**

Maxay Safiyo u tagtay Isbitaalka?

Maxay Safiyo canuggeeda ugu haysan weyday gurigeeda?

Degaanka aad ku nooshahay qoysaska deggani sidee bay ugu dabbaaldegaan dhalashada carruurta?

Waa kuwee laga casuumay dabbaaldeggan ama xafladdani?

Kee baa marti khaasa ah?

Qoysas badan oo Soomaaliyeed ayaa ilaa hadda mooda in canugga wiilka ahi ka fiican yahay kan gabadha ah. . . Waayo?

Dhalashada Cali waa maxay shaqada dheeraadka ah ee ay qoyska u keentay?



Waa in loo sameeyo dharka Ilmaha

Waa in loo beddelo dharka

Waa in loo maydho

In la xusuusnaado daneys Ilmaha

Waa in Ilmaha la geeyo Isbitaalka

Dharkiisa oo la dhaqo Ilmaha

Waa in ilmaha loo qubeeyo

Waa in la seexiyo Ilmaha

Waa in laga celiyo duqsiga ilmaha.

Xool loo sameeyo

Waa in loo sameeyo Abxad Ilmaha

Waa in biyo loo dhaamiyo Ilmaha

In la xambaaro Ilmaha

**Fal Barasho:**


1. U abaabul carruurta inay booqasho ku tagaan xarunta daryeelka caafimaadka hooyada iyo dhallaanka ee ugu dhaw, una diyaari carruurta si ay u sameeyaan liis su'aalo ah oo ay weydiiyaan kalkaaliyayaasha ku hawlan xannaanada abaydinka sannadka hore ee noloshooda. (Haddii ay ku adag tahay abaabulka booqashadani ugu sawir sabuuradda shaxdan tilmaameysa amuuraha hooyooyinka iyo ilmaha oo ay isticmaalaan xarunta aannu kor ku soo xusnay).

   Su'aalo la weydiinayo kalkaaliyayasha ka shaqeeya xarunta xannaanada hooyada iyo dhallaanka.



Maxay hooyooyinka iyo carruurtu u tagaan xarunta xannaanada hooyada iyo dhallaanka?
Waa maxay dhibaatada ay kala kulanto hooyada yari ilmaheeda ugu horreeya.
Maxaa hooyooyinka loo siiyaa waraag adag ama (kaar) oo ay ku qoraan ilmaha miisaankiisa, si ay u ogaadaan habeenba habeenka ka dambeeya wixii ku soo biiray jirkiisa?
Maxay ugu fiican tahay in la qoro dhererka iyo miisaanka ilmaha yar?
Maxay lamaga-maarmaan u noqotay in la qoro nidaamka cunto siinta ilmaha?
Maxaa ilmaha loo tallaalaa? Waa maxay cudurrada laga tallaalaa?
Muxuu muhiim u noqoday tallaalku?
Maxay muhiim u noqotay in la qoro ilmaha cudurkiisa?
Maxaa hooyooyinka loogu dhiirriyaa inay ilmahooda nuujiyaan?
Waa maxay khatarta ku jirta in ilmaha wax lagu siiyo dhalada?
Marka ilmuhu weynaadaba wuxuu u baahan yahay cunto dheeraad ah (dheeri)...
Cuntadee baa ku habboon ama u fiican ilmaha yar yar in la siiyo? (Kuwa da'doodu ka yar tahay 6 bilood)
Tusaale:

Caanaha naaska iyo maalin walba cunto yar oo jilicsan oo ugu yaraan laga sameeyay alaabada hoos ku qoran...
Ukun, Burcad,
Dabacase, yaanyo, Baradho
Kaabash, Digir, Shurbad (qamadi, Bariis)



Marka da'da ilmuhu ku dhaw dahay gu' jir... maalin kasta hal cunto ka sii cuntooyinka hoos ku qoran mid ka mid ah...
Shurbad, Rooti, Bariis, Baasto.
Digir cas, Hilib, Kalluun, Ukun.
Dabacase, Yaanyo, Dube, Liin, Kaabash, Qare (Xab-xab)
Caanaha, Babaay, Muus.

11

**JAMHUURIYADDA D. SOOMAALYA**

*WASAARADDA CAAFIMAADKA*

*Golaha Xannaanada Hooyada iyo Dhallaanka*

*Warqadda Hooyada*

*Golaha* *Numb. Guriga* *Taariikh*

*Magaca* ______________ Jagada ______

Cinwaan ______________________

Da'da __________ Da'da Caado Helidda ______

Da'da Guurka Kowaad ______________

Miisaan Kg. __________ Dherer Cm. ______

Warbixinta Uurarkii Hore

| No. | Caafimaad Uurka | Dhalashada Msc/ | Guri/ | Isbit. | Dhicis Nool Dhintay | L/Dh | Da'da Cunuga Nool/ Dhintay |
|---|---|---|---|---|---|---|---|
| | | | | | | | |

Taariikhda Cabaaridda Dhalmada

Sababaha Xannaanada Gaarka ah

| Kg | | | | | | | | | | | |
|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|---|
| 70 | | | | | | | | | | | |
| 69 | | | | | | | | | | | |
| 68 | | | | | | | | | | | |
| 67 | | | | | | | | | | | |
| 66 | | | | | | | | | | | |
| 65 | | | | | | | | | | | |
| 64 | | | | | | | | | | | |
| 63 | | | | | | | | | | | |
| 62 | | | | | | | | | | | |
| 61 | | | | | | | | | | | |
| 60 | | | | | | | | | | | |
| 59 | | | | | | | | | | | |
| 58 | | | | | | | | | | | |
| 57 | | | | | | | | | | | |
| 56 | | | | | | | | | | | |
| 55 | | | | | | | | | | | |
| 54 | | | | | | | | | | | |
| 53 | | | | | | | | | | | |
| 52 | | | | | | | | | | | |
| 52 | | | | | | | | | | | |
| 51 | | | | | | | | | | | |
| 50 | | | | | | | | | | | |
| 49 | | | | | | | | | | | |
| 48 | | | | | | | | | | | |
| 47 | | | | | | | | | | | |
| 46 | | | | | | | | | | | |
| 45 | | | | | | | | | | | |
| 44 | | | | | | | | | | | |
| 43 | | | | | | | | | | | |
| 42 | | | | | | | | | | | |
| 41 | | | | | | | | | | | |
| Bisha | 2 | 3 | 4 | 5 | 6 | 7 | 1 | 2 | 1 | 2 | 3 |
| Taariikh | | | | | | | | | | | |
| Q. Uurka | | | | | | | | | | | |
| H/da | | | | | | | | | | | |
| G.W.I. | | | | | | | | | | | |
| Barar | | | | | | | | | | | |
| Kaadi-Sokor | | | | | | | | | | | |
| Tal. K. | | | | | | | | | | | |
| B.D.H. | | | | | | | | | | | |
| Hb. | | | | | | | | | | | |
| Cuduro Kale | | | | | | | | | | | |

| Taar. | Hooyada | | Cunugga | |
|---|---|---|---|---|
| | Nuujinta | Mii/ka | War/xin | Mii/ka |
| | | | | |

B

2. Ku dhiirrigeli carruurta inay weydiiyaan hooyooyinkooda goortay?

   Naaska jaqsiiyaan. . . intee bay ahayd muddadu. . .?

   Goorta ugu horreysa ee ay cunto adag idin siiyeen. . .?

   Goorma ayaa ilkaha ugu horreeya idin soo baxeen. . .?


   Goorma ayaa naaska la idinka gudhiyey. . .?

   Goormaad bilowdeen gurguuradka. . . .?

   Goormaad bilowdeen socodka. . .?

Carruurtu ha ka caawiyaan baraha inuu ku sawiro sabuuradda shaxdan hoos ku qoran oo ka hadlaysa ama muujinaysa waqtiyada isku celceliska ah ee ay dhacaan waxyaabahan hoos ku taxan tusaale:

Dhalasho:




3. Weydii carruurta inay ku kaalmeeyaan baraha sidii uu u sameyn lahaa liis ah baahida ilmaha. Waa maxay waxa ilmuhu u baahan yahay siduu ugu koro adadkaan iyo caafimaad labadaba?

   Tusaale:

   Cunto kala nooc ah. . .?

   Dhar kala jaad ah. . .?

   Hooy (guri) . . . deggan nadiif ah. . .?

   Waqti feejignaan, jacayl iyo waxyaabaha uu ilmuhu ku ciyaaro. . .iwm.

4. Ku dhiirrigeli carruurta inay ilmaha ay walaalaha yihiin (wiilal iyo gabdhaha) ka soo qoraan waxyaabahan hoos ku qoran:

   Da'da ilmaha

   Jinsiga ilmaha

   Cuntada ay cunaan

   Habka ay u seexdaan

   Dharka ay xidhaan.

5. U oggolow carruurtu inay ka hadlaan hababka kala geddisan ee dadka kale ee ku nool gurigu ay ku caawiyaan hooyooyinka umusha ah.

**CASHARKA SADDEXAAD**

*Cali aad buu u bukaa (Jirran yahay)*



Bilowga Sheekadan:

Dr. Ruqiya, Cali bay eegtay.
Cali ma eegin Dr. Ruqiya.

Waa Cali wuxuu ku mashquulsanaa oohin oo aad iyo aad buu u ooyaayey. Safiyo oo ah Cali hooyadiis aad bay u welwelsanayd. "Cali ma caafimaad qabin waqti dheer" sidaa bay tidhi hooyadii .......... Waxayna u la muuqatay inuu ka jirran yahay caloosha ........ taasoo uusan wax cuni karin, hadduu cunana waa uu ku bukoodaa ........ marmarna waxa qabta xummad (Qandho) iyo xundhur........

Dr. Ruqiya waxay eegtay Cali indhihiisa. Waxayana qaadatay heer-kulkii Cali. Waxay kaloo dhegeysatay laabta iyo wadnaha Cali. Waxayna dareentay garaaca wadnaha Cali. Waxa kaloo ay riixday caloosha Cali. Waxay sare u qaadday gacanta iyo lugta Cali, iyadoo eegaysa muruqyadiisa. Markaa ka dib Dr. Ruqiya waxay bilowday inay su'aalo weydiiso Safiya, si wanaagsan ayayna ugu jawaabtay.........

| | |
|---|---|
| "Waa immisa jir Cali"? | "...... 10 bilood" |
| "Naaska ma la jaqsiiyaa"? | "...... Maya" |
| "Goormaad ka joojisay naaska"? | "...... Shan bilood ka hor" |
| "Cali ma dhalo buu ku cabbaa caanaha"? | "...... Haa" |
| "Waa maxay cuntooyinka kale ee aad siisaa Cali"? | "...... Shuuro ama soor" |
| "Sidee baad u diyaarisaa dhaladiisa"? | "...... Biyo karsan iyo caano budo ah" |
| "Xaggee bay biyuhu ka yimaadaan....."? | |


Safiya aad bay ula yaabtay ..... Sababta dhakhtarku u weydineyso su'aalahan badan ee ku saabsan waxaan Cali siiyo iyo sidii aan u siiyo..... Cali aad buu u bukaa waxana uu u baahan yahay daawo..... "Hmmm" Dr. Ruqiya baa tidhi..... "Ninkan yari daawo ayuu u baahan yahay ......, laakiin waxyaabo kalena waa u baahan yahay ........"

**Doodda fasalka:**

Waa maxay waxa kale ee Cali u baahan yahay?
Maxay Dr. Ruqiya u weydiisay su'aalahan yaabka leh?
Cali wuu bukay..... muxuu u qaadan waayey cuntadiisa?
Cali waxa haysey xundhur..... xaggee buu ka soo qaaday jeermiskan oo dhalay cudurkan?
Maxaad u malaynaysaa in Cali hooyadii uga joojisay naaska?
Maxay Cali hooyadiis naaskii ugu baddashey?
Sidee buu isbeddelkan Cali ugu keenay cudurka?
Maxaad u malaynaysaa inay Cali ka maqnaayeen?
Marka abaydinku aanay qaadanin cunto ku filan oo ku habboon??!!! ma ku xanuunsan karaan?
Maxaynu u naqaanaa cudurkan?

**Fal Barasho:**

1. Ku sawir taswiirtan dhalada ah sabuuradda.




Ku dheh carruurta "Haddaad tagid isbitaalladeenna waxaad ku arkaysaa sawirkan dhalada ah...... mid la mid ah oo sudhan".

Waa maxay micnaha sawirkan?
Waa maxay ahmiyadda uu leeyahay sawirkan?
Sidee baa dhalada caanaha lagu siiyo ilmaha loo diyaariyaa?
Xagee baa caanuhu ka yimaadaan?
Xaggee baa biyuhu ka yimaadaan?
Maxaa ka buuxa dhuunta dhalada?
Sidee bay dhalada caanaha lagu siiyo khatar ugu tahay ilmaha?

Ku dhiirrigeli carruurta inay ka hadlaan hababka kala geddisan ee dhalada caanuhu ay u waskhoobi kartaa..... una soo jiidan kartaa jeermiska..........

Gacmaha
Duqsiga
iyo usgagaiwm.



2. Baaritaanka fasalka:

Haddii ayan aqoon carruurtu halka ay biyaha ka helaan ama haddii carruurtu ayan fahamsaneyn hababka (dariiqooyinka) ay biyaha u soo weeraraan jeermiska iyo may-kiiroobisku..... ku dhiirrigeli in ay helaan ..........

1. Xagee bay qoysaska intooda badani ka helaan biyahooda?
2. Sidee baa qoysasku badanaaba biyaha u soo dhaansadaan?
3. Sidee baa qoysaska intooda badani u kaydsadaan biyahooda?
4. Ma kariyaan biyaha inta aanay cabbin waxna ku karsan?

Carruurta dhantaa ama cabtaa caanaha lo'da, riyaha iyo geelaba, su'aalo u eg kuwii hore baa la weydiin karaa, keydintooda iyo karintooduba waa muhiim, taasoo ku xidhan nadaafadda shaqsiga gacmaha ku haya caanaha.

3. Tijaabada fasalka (haddii ayan hore ugu soo qaadan safafki hore)

U oggolow carruurta inay kaga soo qaadaan biyo jeegag meesha laga dhaansado, biyahaasi kala badh weel dabool leh ku shub, inta kalana kari dabeeto garab dhig.

Ka dib hal toddobaad, waa maxay isbeddelka dhacay?
Waa jooggee kan isbeddelku ku dhacay?
Waa jooggee kan biyaha nadiifka ahi ku jiraan..... waayo?
Maxay biyaha aan karkarsanayn u noqdeen khatar?

Samee mar labaad tijaabadan oo kale, adoo isticmaalaya caano lis ah (dhaay).

Weydii carruurta su'aalo kuwii hore la mid ah.

Ku sawir sabuuradda sawir muujinaya "Duqsi wasaq ah" jeermiskii. Tusaale:


Ku dhiirri geli carruurta inay ku kaalmeeyaan baraha inuu ku sameeyo liis duqsiyaal wasaq ah.



| **Saaxiib** | **Cadawyo** |
|---|---|
| Gacmo usgag leh. | Gacmo nadiif ah. |
| Duqsiyaasha. | Duqsi la buufiyey. |
| Biyo aan karkarsaneyn. | Biyo karkarsan. |
| Baranbarooyin. | Jiko aan wasaq lahayn. |
| Dhar aan maydhnayn. | |
| Musqul wasaq ah. | Musqul nadiif ah. |

5. Ku taswiir sawirradan soo socda sabuuradda.

Soomaaliaya...... Carruurta Dhimata: (100) Boqolkii carruur ahba ee dhalata waxaa dhimata
17 ka hor inta ayan gaarin da'da gu'-jirka.



6 Carruur ah ayaa u dhimata taytanada.

5 Carruur ah ayaa u dhimata xundhur, shuban, mas calooleed.

3 Carruur ah ayaa u dhimata nafaqo-darro.

2 Carruur ah ayaa u dhimata shuban iyo hunqaaco

1 Carruur ah ayaa u dhinta xummad, dhiig-yari.

17

Ha illaabin cudurrada la kala qaado ee isku gudbiya gacan

gacan nafaqo-darro awgeed.




Maxay carruurtan badani u dhimataa?
Waa maxay cudurrada carruurtu u dhimato?
Waa kuwee cudurrada laga hortegi karaa?

ilaa
Sidee baa la isaga ilaalin karaa?
Kumaa celin kara cudurradaas?
Maxaynu innagu u noqon weyney?

6. Ku dhiirrigeli carruurta inay indha-indheeyaan beeshooda si ay u soo saaraan kuwa ka kaalmeeya dhinaca caafimaadka.

Takhtarrada.
Kalkaaliyayaasha.
Geeda-gooye.
Umulisooyinka.
Sheekhyada.
Dadka wax duuga iwm.



Maxay sameeyaan koox walba oo dadkaa ahi?
Miyey ka hortagaan cudurka mise way daaweeyaan?

Soomaaliya ma u baahan tahay takhaatiirro badan? Ku dhig ama ku qor tirakoobtan sabuuradda.

Soomaaliya: Hal takhtar..... 20,000 qof
Iswiidhan: Hal takhtar...... 6,000 qof

Ma u baahan tahay dad badan oo ka hortaga cudurrada?

**CASHARKA AFARAAD**
*"Cali Walaalihiis"*

Ku bilow. Sheekadan:

Cali imminka waa shan-jir, taasoo si dhaqso ah uu u koray. Aabbihiis Ibraahim iyo hooyadiis Safiyo waxay leeyihiin imminka saddex carruur ah oo kale. Cali wuxuu leeyahay saddex walaal oo wiilal iyo gabdho isugu jira. Halkan waxa jooga Maxamed oo afar-jir ah, Warsame oo laba-jir ah iyo ilmo ugu dambeeyey oo la yiraahdo Abshiro oo afar-bilood jirta, Cali waa uu jecel yahay walaaladiis, laakiin, sida carruurta kale ee ay isku waqtiga yihiin, waxa jira waqtiyo aanu jecleyn walaaladiis.......

Shalay Maxamed wuxuu doonayey inuu ku la ciyaaro kubbad Cali. Maalintaas maalintii ka horreysay Cali wuxuu joogay gurigooda oo wuxuu hayey ilmaha yar (Abshiro) oo walaashiis ah, markii hooyadiis Safiyo ay suuqa ka soo adeegeysay. Xalay Abshiro way kacday iyadoo ooyeysa..... Calina waa uu kacay. "Aniga oo ugu weyn carruurtayada maxaan isu yeel yeelayaa"? Cali baa yidhi..... "Fiiri dhammaan shaqada dheeraadka ah ee aan qabanaayo......"

Anigu waxaan ahay midka guriga xaaqa.
Anigu waxaan ahay midka biyaha soo dhaamiya.
Anigu waxaan ahay midka qof walba u geeya cuntada.
Anigu waxaan ahay midka wax siiya Warsame oo ah walaalkayga iga yar.
Anigu waxaan ahay midka gogla sariiraha oo dhan.

"Waa maxay waxa sii xumaynaaya ilmaha cusub. Hooyaday ma hayso waqti badan oo ay ila joogto.....
Aabbuhuna wuxuu la ciyaaraa ilmihiisii yaraa, anigase waqti iima hayo (laga yaabee inay Cali u tahay maalin xun)".

"Anigu ma garanaayo" buu yidhi Cali, "dhammaan walaalahay waa ay fiican yihiin......; laakiin anigu waxaan jeclaan lahaa inay iga waaweynaadaan, waayo way iga caawin lahaayeen shaqada aan qabto".

**Doodda Fasalka.**

1. Ku caawi baraha inuu ku sameeyo sabuuradda liis ah dhammaan waxyaabaha inammada laga filayo inay ka qabtaan guriga agagaarkiisa iyo beertaba.
2. Ku kaalmee baraha inuu ku sameeyo sabuuradda liis ah waxyaabaha laga filayo gabdhaha inay ka qabtaan guriga agagaarkiisa.
3. Isku qiyaas labada liis.
4. Carruurta ka dhalatay qoysaska ballaaran ma ka hawl badan yihiin carruurta ka dhalatay qoysaska yar-yar? (Carruurtu ma ku fikeri karaan dariiqo ay ku helaan)?

qoraal


**Fal Barasho.**

1. Samee sawir ah qoyska Ibraahim, Tusaale.

| | | | |
|---|---|---|---|
| Sano | Sano | Sano | 4 bilood |
| 5. Cali | 4. Maxamed | 2. Warsame | Abshiro |


Immisa sano ayaa u kala dhexeysa carruurta?

2. Ku dhiirri carruurta in ay dersaan ama bartaan sawirradan hoos ku dhigan...............



1. Carruurtee baa ugu culays badan?
2. Maxay carruurta dhalashadoodu kala fog tahay u miisaan weynaataa?
   Baruhu ha kula caawiyo jawaabta).
3. Maxaa dhici kara marka carruurtu dhalata.... ka hooseeya miisaanka caadiga ah?
4. Maxaa loola jeedaa ilmo aan dhamays ahayn..... (dhasha inta aan dhamaysan sagaal bilood).
5. Maxay u noqotay muhiim ama lagama maarmaan in la kala fogeeyo dhalmada?
   (Xásuus; waxay ku qaadanaysaa hooyada in ay ku soo ceshato dhiiggii ka baxay waqtiga umusha laba sano iyo ka badan).

3. Weydii carruurta fasalka ku jirta inta xayawaan ay rabbeysteen oo ku haystaan guriga..... u sharax ama uga sheekee bisadaha ama eyda yaryar. Weydii in ay sharxaan xajmiga xayawaannada yaryar sida bisadaha yaryar). Maxaa badanaaba ilmaha bisaduhu ay uga yaryar yihiin kuwa kale...? (waayo, bisaddu waxay dhashaa afar ilmood. Afartaa mid ka mid ahi aad buu xajmigiisa iyo baaxaddiisu u yar yahay... marmarka qaarkood). Maxaa ku dhaca midka ugu yar tirada ilmaha diibiyadda iyo doofaarrada?
4. Weydii carruurta ay aabbayaashood beeraleyda yihiin in ay u sharxaan carruurta kale ee ku jirta fasalka, waxa dhaca marka dhirta oo nooc kasta ah loo beero si isku dhawdhaw. Sidee baa dhirtaasi u baxdaa? Maxay lagama maarmaan u noqotay in marka dhirta la abuurayo (beeraayo) loo kala dhexeysiiyo dhul ama la kala fogeeyo?
5. Cali aabbihiis iyo hooyadiis waxay dhaleen afar carruur ah...... sida darteed, hal guri waxa ku nool lix qof, hase yeeshee, marka qoysku ballaadhaba waa in uu gurigana sii ballaadhaa ama sii kordhaa.




(U oggolow carruurta in ay sawiraan Cali gurigiisa..... iyo sida uu u kordhay).

Hal cunto waa in ay cunaan lix qof?


Ama waa in cunto dheeraad ah la beero ama la soo gado.

(Haddii 500 oo shilin lagu masaruufo afar carruur ah..... immisa ayaa ku filan siddeed (8) qof?..... ka digtoonow.... lagama yaabo in carruurtu ay cunto cunno isu dheellitiran, si ay uga koraan dhinaca jirka.

Hal ashuun oo biyo ah ayaa waxaa wada cabba lix qof 900?

Ama waa in biyo dheeraad ah la soo gataa, 800? 1000?

(Haddii 200 oo shilin lagu kharash gareeyo bil kasta biyaha ay isticmaalaan afar qof........Immisa ayey ku kacaysaa 9 qof lacagta biyuhu)?





200 Shilin 4 qof

? = 9 (sagaal qof).

6. Ku sawir sabuuradda laba wareeg oo isle'eg...






Wareeg kasta wuxuu muujinayaa waqtiyada ay hooyadu haysato maalintiiba.


U qaybi wareegga hore afar qaybood (4)


U qaybi kan kalena siddeed (8) qaybood.

U oggolow carruurta in ay ka hadlaan inta waqtiga ah ee ay hooyadu ku qaadato xannaanada ilmo kasta oo ay dhashay.

7. **Falanqaynta Fasalka.**

Sii carruurta waqti ay ku weydiiyaan saaxiibbadooda ama qaraabadooda.... ama dukaanleyda kala joogta magaalada iyo tuuladaba.... Qiimaha ay joogaan waxyaabahan hoos ku qoran.......





1. Armaajo qolka jiifka ee carruurta.
2. Sariirta ilmuhu ku seexdo.
3. Dharka carruurta oo dhan iyo kabaha.
4. Koob, Saxan, Galaas, Fandhaal (qaaddo), Fargeeto iwm. oo uu abaydinku wax ku cuno.
5. Buugga akhriska oo loogu tala galay ilmo kasta.
6. U ogglow in uu aado ilmo kastaa shinimada.
7. Baaskiilka carruurta.

U oggolow carruurtu in ay ku dhuftaan qiimaha qaarkood oo ay suurowdo in ay dhacaan mar ama laba jeer, kuwa kalana ay dhacaan bil kasta 4 jeer, iyo ugu dambeyntii 8 jeer. Ha ka hadlaan natiijada soo bixi doonta.

*CASHARKA SHANAAD*
"Cali Dugsi buu galay."
**(Cashar Xisaabeed)**

**Ku bilow Sheekada.**

Waxay ahayd bishii Oktoobar, Calina lix jir buu ahaa, Ibrahim oo ahaa Cali aabbihii wuxuu ku yidhi xaaskiisa (Ooridiisii) Safiya.... "Dhawaan waxa ina soo haysa bishii Noofembar, waxana bilaabmaya sannad-dugsiyeedkii". "Cali waa in uu tago dugsiga", ayey ku tirabtay Safiya..... "Innagu waa inaynu ka fekernaa sidii loo heli lahaa lacagta uu Cali u baahan yahay..." "Lacag"? Ibraahim baa weydiiyey.... "Laakiin, dugsigu waa lacag la'aan". Safiya oo ah marwo wanaagsan oo leh caqli fiican waxay ku jawaabtay..." waa in aynu sameyno liis ah waxyaabaha uu Cali u baahan yahay sannadkiisa hore ee dugsiga".... Kani waa liiskii Ibraahim iyo Safiya ay sameeyeen.....



| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| Dharka dugsiga .................. | 200 | oo | Shilin | |
| Kabaha dugsiga ................. | 60 | " | " | |
| Buugagga ........................ | 100 | " | " | |
| Qalimada ........................ | 20 | " | " | (200 maalmood ayaa ku |
| Quraacda ........................ | 1000 | " | " | jirta sano-dugsiyeedka) |
| Nooliga Baska ama Baabuurka<br>Maalin walba waa 6 Shilin | 1200 | " | Shilin | |

Isugeyn:- 2,580 Shilin Sannadkiiba

Ibraahim wuxuu eegay wadarta lacagtaasi, wuxuuna xoqday madaxa... "ma noqon karto sax", buu yidhi Ibraahim. "Anigu waxaan qaataa 600 oo Shilin bishiiba, waa in ay jirto meel aan ka bilaabi karo..." wuxuu isku dayey in uu dhimo kharashkani, laakiin, wey ku adkaatay. Ooh, "Ibraahim oo yaabban baa yiri... "intaa kuma dhama, sannadka soo socdaa laba carruur ah ayaan qoreynaa dugsiga, sannadka ku xiga saddex carruur ah. Markaa waa inaan raadsadaa shaqo kale".

**Doodda Fasalka:**

Ibraahim iyo Safiya wax ma ilaabeen? Ma ku raacsan tahay qiimaha?

Kharashku ma ka badan yahay mise waa ka yar yahay degaanka aad ku nooshahay?

Sidee bay Ibraahim iyo Safiya kharashkii u yareeyeen?

(ma jiraa wax loo kaydiyey safarka iyo quraacda?)

Ibraahim iyo Safiya ma awoodi karaan in ay saddex carruur ah ama afar carruur ah dugsi u diraan?


Sidee bay arrintani u maamuleen...? Ka fikir dugsi quraanka.

**Fal barasho:**

Ma qaato lacag aad u badan oo uu ku dhaqo qoyska, sidaa ma tahay? **22**

Aynu eegno waxa Cali waalidkii uu ugu fadhiyo.


Ku dhiirri carruurta iyagoo kaalmeysanaya baraha sidii ay u soo saari lahaayeen kharashyada soo socda.



1. Kharashka cuntada dheeriga ah ee Cali hooyadii Safiya ay u baahnayd marka ay uurkiisa lahayd, qiimaha hal cunto maalin walba (oo dheeraad ah) oo ka kooban digir, caano, kalluun, ukun, hilib, khudaar....

   Hal cunto = 7 beri oo min 40 toddobaad ah .....

   Qiimaha ________________




2. Qiimaha hal sano oo Cali naaska nuugayey.
   Qiimaha hal cunto oo dheeraad ah maalin keli ah (sida kor ku xusan)
   Hal cunto = 7 beri min 52 toddobaad ah.....

   Qiimaha ________________

3. Qiimaha ku baxay cuntada Cali laga soo bilaabo da'diisu markay ahayd gu' jir ilaa 15 jir, markuu Cali dhammaystay dugsiga iyo inta uu shaqada galay.

   Qiimaha hal cunto = X 2 cunto maalin qura X 7 toddoba maalmood X 52 toddobaad sannadkiiba, oo min 14 sano ah.....

   Qiimaha ________________



4. Kharashka ku baxa dugsi u diridda, isku celceliska qiimaha sannadkiiba ku kacayo dharka dugsiga, buugagta, qalmaanta, quraacda, qadada iyo gaadiidka. Isku celcelinta kharashka sannadkiiba X 8 sano oo ah dugsiga dhexe.....

   Qiimaha ________________


5. Qiimaha dharka Cali. Qiimaha shaarka iyo kabaha. Isku celcelinta kharashkani = X 14 (ama qiimaha dharka dugsiga siddeed sano ah.......)

   Qiimaha ________________



6. Qiimaha caafimaadka Cali. Qiimo sannadeed isku celcelinta daawada sida Aasbariinka, Fitamiinka iwm. isku celcelinta sannadkiiba = X 15 sano .....

   Qiimaha ________________



7. Qiimaha madaddaalada Cali, isku celcelinta kharash sannadeedka ku baxa shineemooyinka, ciyaaraha, iyo waxyaabaha lagu ciyaaro. Isku celcelinta qiimaha sannadkiiba X 15....

   Qiimaha ________________

Wadarta Guud Qiimaha ________________

B. Weydii carruurta inay isku dayaan sidii loo yareeyn lahaa kharashkan.;

Shey aynu ka saari karno?
Ma jiraan halkani (Shey aynaan ku dari karin?
Ka fikir qiimaha (kharashka) gaadiidka waqtiga fasaxa ah?
Ka fikir kharashka booqashada takhtarka ilkaha?
U qaado in Cali uu helay shaqo aan joogto ahayn isagoo da'diisu tahay i2 jir.
kala jaridda tiridani ma sameeysay faraq aad u badan?
Toddobaadkii immisa ayuu shaqaystaa ama soo gala?


T. Haddii aynu isla oggolaannay ama isla ..... garannay tiradani .... weydii carruurta inay ku dhuftaan tiradani isku-celcelinta tirada carruurta ee fasalka ku jirta qoysaskiiba. Isku-celcelinta baaxadda qoyska Soomaaliyeed waa 5 (shan). Weydii carruurta inay ku dhuftaan 5 qiimaha guud ee kharashka).

J. Weydii carruurta inay qiyaasan isku-celcelinta dakhliga qoysaska Soomaaliyeed, ama u oggolow inay ka shaqeeyaan celcelinta sannadkiiba qoysaska qaata ama mushaharkoodu yahay 600 oo shilin bishiiba .... 1000 shilin bishiiba iyo 1500 oo shilin bishiiba. Midkee baa qoyskani wax siin kara shan (5) carruur ah ?

X. U qaybi hal ama kala badh isku-celcelinta baaxada qoyska. Immisa lacag ayaa u dhiganta?
Waa maxay waxa qoysku ku kharash gareeyo ama ku qabto lacagtani? (ku cawi carruurta inay sameeyaan liis ah sida qoysku u isticmaalo lacagtiisa).

Ka fikir qol dheeraad ah oo lagu kordhiyo ama lagu daro guriga qoysku ku nool yahay.

Alaab dheeri ah.
Sariiro cusub.
Qalab koronto oo wax lagu karsado.
lacagta fasaxa (lacag loogu talo galey waqtiga fasaxa ah).
Lacagta gaadiidka.
Lacagta waxbarashada.
Lacagta biyaha.
Lacagta daawada. iwm.



KH. Malee (qiyaas)

1. Cali wuxuu ka tagay dugsiga isagoo 15 jir ah, wuxuu helay shaqo la xiriirta dhaqidda matoorrada baabuurta yar yar. Isagoo qaadanayo 400 oo shilin bishiiba Cali wuxuu lacagtaa ka siiyaa waalidkiisa 200 shilin bishiiba. Immisa ayey Cali ku qaadaneysaa inuu ku gudo (magdhabo) kharashkii uu waalidkiisu geliyey?

2. Cali waa inuu galo dugsiga Sare isagoo 19 jir ah. Waa maxay qiimaha ama kharashka dheeriga ah ee uu u baahan yahay in uu waxbarashadiisa ku sii wato? immisa, malee Cali oo dhammeystay dugsiga sare, helayna shaqo fiican oo ah makaaniknimo matoor isla markaana qaata 900 oo shilin bishiiba, waalidkiisna siiya 400 oo shilin. ?

   Intee bay Cali ku qaadanaysaa in uu dib ugu gudo waalidkiisa kharashkii ay galiyeen ?

3. Malee (qiyaas) Cali oo galay Jaamacadda, qaatayna shahaada Injineernimada ah isagoo ah 23 jir. Waa maxay kharashka kale ee Cali ku soo biiray? Ka dib markuu dhammeystay Jaamacadda wuxuu helay shaqo fiican oo ah barid Injineernimo iyo mushahar dhan 1400 shilin bishiiba. Cali wuxuu siiyaa waalidkiisa 800 oo shilin bil kasta. Immisa ayay Cali ku qaadaneysaa inuu u gudo (ama magdhabo) waalidkiisa kharashkii ay galeen?

**Doodda fasalka.**

Muxuu layligani inoo sheegayaa?
Waqtigee ugu gaaban ee lagu bixin karaa lacagtaasi?
Tee ugu dheer?
Da'dee baad filaysaa in uu Cali ku guursan doono ?

Maxaa ka dhici doona kharashkaas la bixiyey ?


**D. Ku dhiirigeli carruurta inay ka hadlaan ama falanqeeyaan doodaha soo socda.**
**Waa maxay Murannada raacsan diidan ... ama mid kula jira iyo mid kaa jira?**

Waqtigii Abshiro ay dugsiga tegi lahayd ayaa la soo gaaray.

"Maxaa ka faa'iido ah" buu yidhi Ibraahim. "Abshiro way weynaan doontaa, waana la guursan doonaa .... sidaas darteedna waxbarashadeeda oo dhammi way khasaari doontaa ama (lumi doontaa)".

"Waxayna ila tahay inay fikrad fiican tahay in Abshiro ay dugsiga aaddo" bay tidhi Safiya, iyadoo ku barbaari doonto oo noqotana qof hawl-kar ah iyo hooyo fiican taas oo u soo hoyin doonto ninkeeda dhaqaale heer sare ah. Abshiro waa inay aqoonteeda wanaagsan ku heshaa shaqo ka hor inta ayan guursan".


"Aah", Ibraahim baa yidhi, "waxa jira hanti kale oo laga helo carruurta badan taasoon lagu qiyaasi karin lacag ahaan, bal malee shaqooyinka ay carruurtu ka qabtaan agagaarka guriga. Haddii aan carruurta kaalmo laga helin waxaynu u baahan nahay in aynu soo ijaaranno qof kale .... ". Waa maxay faraqu?



*"Cali aqoon buu ka korodhsaday dadkii"*

Ku Bilow Sheekada.

Toddobaadkii hore, run ahaantii, Cali naftiisa ayuu u raaxaynayey. Maalin kasta, isaga iyo fasalkiisa waxa loo ogōolaaday in ay ka baxaan dugsiga waqti hore, si ay uga qayb galaan ololaha nadaafadda waddooyinka. Galab kasta, Cali iyo saaxiibadiisu, waxay ku ururaan xafiiska Dawladda Hoose ee tuuladooda iyaga iyo dadweynaha kale. dadku waxay wataan xaaqimo (mafiiqyo) iyo dambiilo, guddiga xaafaduna waxay siiyeen gaari-gacmeed iyo gaari xamuul weyn ah si ay ugu qaadaan qashinka waddooyinka. Dadka qaarkii waxay sitaan durbaanno kuwaasoo la garaaco wagtiga gaardiska ama dhoolo-tuska, qaar kalena waxay wataan calamo. Nin madax ah oo dawladda ka tirsan ayaa wuxuu sitaa makrafoon. Hase ahaatee, Cali iyo saaxiibkiisa Warsame ayaa qabta hawsha ugu cajiibsan. Waxaa loo oggolaaday labadoodaba inay fuulaan baabuurka weyn gudahiisa. Sidaa darteed, Cali wuxuu halkaas ku barta dad badan oo uusan la kulmeen markii hore. Waxaa jira oday la yiraahdo Cusmaan oo ugu shaqo badnaa dadka oo dhan. Waxa iyana jirta ooridii (ama afadii) Geedi oo ku guubaabisay dadka oo dhan inay wadajir u shaqeeyaan. Waxa isna jira Axmed Yuusuf oo ugu dambeeya kaasoo had iyo jeerba hubiya in aan waxba lagaga tegin .... goobaha laga shaqeeynaayo. Cali iyo Warsame, run ahaantii, way ka heleen shaqadan, dadkuna waxay u qireen in ay "hawl kar yihiin". Cali aad buu ugu qabweyn yahay dadkiisa iyo tuuladiisa iyo nadiifinta waddooyinka. Sida uu yiraahdo Oday Cusmaan tuulada bilicda lihi waxay u qiimo badan tahay sida guriga nadiifsan", laakiin laga yaabee inuu Axmed Yuusuf iyo qofkasta ka mas'uul yahay caafimaadka dadka intiisa kale".



**Doodda Fasalka.**

Maxay waddooyinka wasaqsani caafimaadka halis ugu yihiin?
Maxaa dhaca haddii aan qashinka la ururin?
Maxay tahay weedha "Cudurrada faafa" micnihiisu?
Intee nooc oo cudurka faafa ah baa ka dhacay, ama ka dhaca Soomaaliya?
Maxay u tahay khatar caadada candhuufta la tufaa?
Qufac iyo hindhisada laga sameeyo meel caam ah, maxay u dhimi karaan dadka kale?
Maxay dadku ugu qubaan biyaha wasaqda ah waddooyinka?
Maxay ololaha nadaafadda waddooyinka ku kaalmayn kartaa sida ay qofkasta mas'uul uga yahay caafimaadka dadka kale.

Falal:

1. Ku muuji sabuuradda garaafka soo socda oo ah xaddiga dhimashada Soomaaliyeed 1950 ..... 1980.


   Muxuu hoos ugu dhacay xaddiga dhimashada Soomaaliyeed?
   Maxaa laga qabtay horumarka caafimaadka guud?
   Maxay dadka Soomaaliyeed ka qabteen horumarka caafimaadka guud?

   U oggolow carruurta inay ka hadlaan waxa soo socda :
   Ololaha nadaafadda suuqa.
   Ciribtirka cayayaanka (xasharaadka).
   Horumarinta nadaafadda biyaha. iwm.


2. Ku dhiirrigeli carruurta inay soo arkaan dekedaha.

   Xeryaha qaxootiga.
   waddada ay maraan cuntooyinka iyo alaabooyinku.
   Sariibada iyo dukaannada caadiga ah.


   Waa maxay raashinka la inoo soo dhoofiyaa (keena)?
   Waa maxay dharka la inoo keenaa?
   Waa maxay qalabka dhismaha ah ee la inoo keena?
   Xaggee baa alaabtan laga keenaa?
   Sidee baa waxyaabahani u horumariyeen caafimaadka dadka Soomaaliyeed.




3. Ku muuji sabuuradda taswiirahan fudud ee soo socda
   Tiradii takhtarrada Soomaaliyeed 1970 - 1980
   Tiradii kalkaaliyaasha Soomaaliyeed 1970 - 1980




Soomaaliya tiradii sariiraha isbitaallada
yaalay 1970 1980




Tirada takhtarrada, kalkaaliyayaasha iyo sariiraha isbitaalladu way kordheen.
Sidee bay u hormariyeen caafimaadka dadka?

U oggolow carruurta inay ka hadlaan noocyada kala geddisan ee takhtarrada ah kalkaal-iyayaasha iyo isbitaallada ama booqashada haddiiuu qof beeshiinna ahi ku jiro.

4. Ku muuji sabuuradda tirokoobta soo socota
% Boqolkiiba dadweynaha wax qori kara waxna akhriyi kara.





Sidee bay uga faa'iideysteen dadka wax akhri karaa waxna qori karaa horumarinta caaf-imaadka dadka Soomaaliyeed?

Weydii carruurta in ay ka fikiraan siday u abaabuli lahaayeen ololE nadaafeedka suuqa? Sidee bay u qabteen? Ma u sahlan tahay mise way ku adag tahay dadweynaha waxna qori kara waxna akhriye kara?

5. Markii aynu horumarinaya caafimaadka dadka, xaddiga dhimashadu hoos ayuu u dhacay. (Gaar ahaan xaddiga dhimashada abaydinka iyo carruurta).
U fiirso waxa ka dhacay Soomaaliya.
Ku muuji sabuuradda taswiirta fudud ee soo socota.

| | 1950 | 1980 |
|---|---|---|
| X. D. | 47 : 1000 | 47 : 1000 |
| X. D. | 32 : 1000 | 16 : 1000 |
| | 15 | 31 |



1. Sidee bay tirada dadweynuhu u kordheysay 1950kii? (1.5% sannadkiiba)
2. Sidee bay u kordheysay 1980? 3.1% " )
3. Maxaa isbeddeley?

Maxay u noqotay marka caafimaadka dadka la horumariyaba ....
Saamiga ay dadweynuhu ku kordhayaan aad ayuu u sarreeyaa, haddii xaddiga dhalashadu aanay hoos u dhicin. Koritaanka sarreeyaa waxa uu xayirayaa horumarka caafimaadka dadweynaha.)

U oggolow carruurta inay fiirsadaan shaxda soo socota ....

Tirada dadka ku aaddan halkii sariir isbitaal.

1970 = 806.
1980 = 839.

Maxaa dhacay ... ? Tirada dadku way kordhay ... ? Waxa jira in dad aad u faro badani wadaagaan sariiraha yaala isbitaalka.
Waa maxay khatarta ku jirta ama ku sugani? Waayo isbitaalku malaha sariirro ku filan dadka?

6. Ku dhiirigeli carruurta fasalka ku jirta inay la sheekeystaan Ayeeyooyinkooda iyo Awooweyaashooda.
Maxaa ku dhacay waalidkii dhalay carruurtaasi markii ay aad u yaraayeen cudurrada ku dhacay ... ?
Xaggee bay baaritaan caafimaad u tegi jireen? Kuma ayey u tegi jireen? Xaggee bay imminka tagaan?
Waa maxay isbeddelka dhacay?
Sidee baynu u rajeyneynaa waxyaalo fiican?
Waa maxay isbeddelkani micnihiisu .... ?

Isbitaallo badan .... takhaatiir badan, bukaan-socod-eegto badan iyo kalkaaliyayaal badan .... isla markaana wanaagsan.

